# Saamerka maanta

Noorway waxa daggan bulsho saamar ah oo lagu qiyaaso 30,000-40,000. Waxa ay daganyihiin meelo kala duwan, waxana ay hayaan shaqooyin kala duwan. Qaar waxa ay dhaqdaan ugaarta sida famiiliga Makaahiil.

Makaahiill waxa uu daganyahay magaalada Kautokeino ama Guovdagenidnu sida ay ugu yeedhaan saamerku luqadooda. Kautokeino waxay ku taal balaca Finnmark. Waqtiga mugdiga ah ee qabowga ama jiilaalka laba bilood ayey qorraxdu ka maqantahay oo aanay arag qorrax, habeenkii waxa iftiimiya dayaxa, ilayswoqooyiguna (nordlyset) waxa uu ka bikaacaa samada. Laba bilood oo ka mid ah waqtiga guga ah ama samarka ah qorax ayaa habeen iyo maalin ka jirta magaalada lagu magacaabo Kautokeino, Waxa loogu yeeraa qorraxdii habeen barka.(midnattssol). Makaahiil waxa uu leeyahay toban neef oo ugaar ah.

Markii uu Makaahiil dhashay ayey ayeydii siisay neef ugaarah, waxaanay u dhshay waylo. Markii ay waylihii koreen ee ay waawaynaadeen waxay dhaleen waylo kale oo waa ay tarmeen. Haddii la waydiiyo inta ugaar ah ee uu haysto, ma uu sheego waayo haddii uu sheego waxay ka dhigan tahay nasiib xummo. Markii abootadiis ay yarayd waxay daganeyd ama ku noolayd cariish waqtiga qabowga ah. Cariishku waxa uu ka samaysnaa ulo dusha maqaar lagaga daday oo loo sameeyey sida teendhada. Beryihii hore famiiliyada saamerka ee dhaqda ugaartu waxa ay degi jireen halka ay ugaartu hadba joogto. Laakiin qoyska Makaahiil uma baahna in ay marba laguuraan ugaarta, laakiin waa in ay mar walba ka war hayaan in ugaartoodu helaan meel daaqleh. Makaahiil iyo qoyskoodu waxay daganaan karaan Kautokeino, waayo aabihiis ayaa waxa uu haystaa Mooto barafeed(snøskutter) uu kaxaysto marka uu ugaarta soo

hoynayo. Waqtiga guga ama samarka qosyka Makaahiil waxa ay u la guuraan ugaarta xeebta iyo jasiiradaha ku dhow si ay ugeeyaan meel daaqsin fiican leh.

Makaahiil Waxa uu dhigtaa dugsi ama osgool ku yaalla Kautokeino, halkaas oo uu ku barto luqadda noorwiijiga iyo ta saamiiska labadaba.



Foto: belov3097/ AdobeStock

**I. Laylis:**

1. Waa imisa tirada saamarka daggan Norwey?

2. Makaahiil qoyskoodu halkuu daganyahay?

3. Hawada Kautokeino waa sidee?

4. Maxaa Kautokeino lagu yiraa luqadda saamiska?

5. Imissa bilood ayaanay Kautokeino arag qorrax waqtiga wintarka ama jiilaalka ah?

6. Maxaa iftiimiya Kautokeino waqtiga mugdiga ah?

7. Kautokeino qariidada ka raadi meesha ay kaga taal?

8. Waa maxay habeenbar qorraxeedku ama midnattssol?

9. Maxay Makaahiil faamligiisu ugaarta ula guuri waayeen waqtiga qaboobaha?

10. Halkay u daaq geeyaan ugaarta waqtiga guga?

**II. Buuxi meelaha bannaan**

1. Makaahiill waxa uu daganyahay magaalada --------------------------.

2. Kautokeino waxay ku taal -------------------- Finnmark.

3. Waqtiga mugdiga ah ee qabowga ama ----------- laba bilood ayey qorraxdu ka maqantahay oo aanay arag qorrax, habeenkii waxa iftiimiya ---------, ilayswoqooyiguna (nordlyset) waxa uu ka bikaacaa samada.

4. Laba bilood oo ka mid ah waqtiga guga ah ama samarka ah qorax ayaa habeen iyo maalin ka jirta magaalada lagu magacaabo Kautokeino, Waxa loogu yeeraa ------------------------------.(midnattssol).

5. Makaahiil iyo qoyskoodu waxay daganaan karaan -------------------, waayo aabihiis ayaa waxa uu haystaa ----------------(snøskutter) uu kaxaysto marka uu ugaarta soo hoynayo. Waqtiga ---------------- ama samarka qosyka Makaahiil waxa ay u la guuraan ugaarta xeebta iyo jasiiradaha ku dhow si ay ugeeyaan meel daaqsin fiican leh.